

Ku-bilaabidda adeegyada carruurnimada hore inay carruurta barato Ingiriisiga oo luqad dheeraad ah.

Bilowga habboon ee adeegga carruurnimada hore waa muhiim.

Waxaa qiimo weyn u leh waalidiinta iyo carruurta inay soo booqdaan adeegga ka hor intaysan bilaabin. Markay suurtagal tahay, ku bilow casharo gaagaaban ilaa aad ka gaarto casharada dhaadheer si carruurta loogu caawiyo inay la qabsadaan ayna dareemaan farxad.

Waalidiintu waxay ka filayaan bareyaasha inay si diiran u soo dhaweeyaan ayna ku dhiirigeliyaan adeegsiga luqadaha aan ahayn Ingiriisiga. Badiba adeegyada waxay karaan inay waalidiinta siiyaan adeegga turjumaanka taleefanka kuwaas oo horumarinaya Ingiriisiga oo ah luqad dheeraad ah si loogu caawiyo inay fahmaan macluumaadka. Intaas waxaa raaca taageerada labada luqadood ayaa la heli karaa xili muddo gaaban ah si carruurta loogu caawiyo carruurta inay ku hadlaan luqad aan ka ahayn Ingiriisiga si ay ula qabsadaan adeegga.

Bareyaashu waxay soo dhaweynayaan ka-qaybgalka waalidiinta ee dhinacyada badan ee barnaamijka. Taas waxay carruurta ka caawisaa inay soo-dhaweyn dareemaan ayna ku xirnaadaan guriga iyo nadaamka carruurnimada hore. Waalidiinta waxay ka caawisaa inay fahmaan waxa ka dhacaya adeegga markii ilmahoodu joogo halkaan ayagoon ayagu la joogin.

Siyaabaha ay waalidiintu ugu taageeri karaan carruurtooda inay la qabsadaan adeegyada carruurnimada hore.

- Waqti la qaadashada ilmahooda markay joogaan adeegga – ayna ilmahooda uga sheekeeyaan howlaha joogtada ah ee adeegga markay dheelayaan, sheekooyinka aqrinayaan, heesho ku heesayaan, carruurta kalena la hadlayaan.
- Kala hadlidda ilmahooda wax ku saabsan waxay la kulmaan ama dareemayaan. Tiiliyaan ayna dhiirigeliyaan carruurta.

Bareyaashu waxay doonayaan inay gartaan oo ixtiraamaan dhaqanka iyo caadooyinka qoysaska ayna xasaasiyad u yeeshaan khibradihii hore. La-wadaagidda macluumaadka qoyska bareyaasha waxay ku caawisaa inay si fiican u gartaan carruurta, qoysaska, luqadda, siyaabaha noloshooda iyo waayo-aragnimada carruurta. Tusaalooyinka macluumaadka ay waalidiintu siin karaan adeegyada carruurnimada hore oo ku saabsan carruurtooda waxaa ka mid ah:

- Macluumaadka ku saabsan caafimaadka carruurta – talaalka, baahiyaha caafimaad, jirrooyinka ama aleerjikada.
- Sida ay waalidiintu u baddalaan naabiyada carruurta.
- Sida ay carruurta u isticmaasho musqulaha (musqulaha lagu adeegsado adeegyada carruurnimada hore ma lahan albaabo si ay bareyaashu ula socdaan carruurta una caawiyaan hadday u baahdaan).



- Cuntooyinka carruurta cunaan, caadooyinka waqtiga cuntada / howlaha joogtada ah.
- Sida carruurta u barten in cuntada la siiyo ama ayagu cunaan iskood.
- Baahiyaha nasiino / seexasho ee carruurta: tusaale heesaha ay waalidiintu u qaadaan, buug ay jecel yihiin, tooy gaar ah ama buste iyo waqtiyada carruurta badanaa nastaan/seexdaan maalintii.
- Sida waalidiintu ugu raaxeeyaan ilmaha.
- Sida waalidiintu u taageeraan edebta ilmahooda tusaale, waa maxay anshaxa lagu adeegsado auriga.
- Waxay carruurta jecel yihiin inay ku dheelaan.
- Dhaqanka iyo aadooyinka qoyska iyo damaashaadka.

Ku abuuridda luqadda guriga iyo dhaqanka ee carruurta nadaamka carruurnimada hore:

Aqoonta iyo xirfadaha aqris-qoraalka iyo xisaabta carruurta waxaa lagu taageeraa bareyaasha oo ku mashquuliya carruurta wada-hadalka, ku dhiirgeliya carruurta inay yeeshaan xirfadaha fikirka ayagoo jilaya riwaayad, wadaagaya buugagta aqrinaya sheekooyin, heesaya lana dheelaya carruurta. Waayo-aragnimooyinkaas waxay kaloo carruurta ku caawinayaan inay bartaan Ingiriisiga.

Waalidiinta waxaa lagu dhiirgelinayaa inay

- Aqriyaan sheekooyinka sawirka ah uguna sheekeeyaan ilmahooda luqadda gurigooda iyo carruurta kale ee adeegga joogta.
- La qaataan waqti ay kula hadlaan ilmahooda iyo kuwa kale oo ay isla luqadda ku hadlaan.
- Baraan bareyaasha heesaha, ritmooyinka iyo suugaanta luqaddooda kuwaas oo bareyaashu ay u adeegsan karaan carruurtooda oo dhan.
- Keenaan muusiga dhaqankooda □ oo ah muusig duuban ama qalab ah.
- Keenaan waxyaalaha u gaarka ah ama badanaa laga isticmaalo dhaqankooda, sida sawirada ama farashaxanka.



Incorporating Multicultural Resource Centre

Ground Floor, 9-11 Stewart Street
Richmond, 3121

tel: +61 3 9428 4471

fax: +61 3 9429 9252

email: fkacs@fka.org.au

web: www.fka.org.au

FKA Children's Services Inc. 215663278505573

